fact sheet

Cabashooyinka ku saabsan mulkiilayaasha iyo wakiilada guryaha

Haddii ay kula tahay in mulkiilahaagu ama wakiilka gurigu in uu u dhaqmay si sharci darro ah ama aqoonta shaqada ka soo horjeeda, waa inaad ka fekertaa sameynta cabasho rasmi ah.

Waxa sharcigu leeyahay

Residential Tenancies Act 1997 Wuxuu dejiyey xuquuqda iyo waajibaadka kireystaha iyo mulkiilaha Victoria. Haddii mulkiilaha ama wakiilkoodu uu galo dembi sharciga hoos imanaya, waxaa maxkamada hoose geynaya Consumer Affairs Victoria haddii lagu xukumo dembiga waa la ganaaxi karaa. Si kastaba ha ahaatee adiga ayay ku jirtaa inaad sameyso cabashada oo aad weydiiso consumer affairs inaad dacweyso.

➲ wakhtiga dacwada ee xaddidan waa 12 bilood ama 3 sanno (iyadoo ku xiran dembiga), oo ka bilaabaneysa taariikhda dembiga la galay. Si kastaba ha ahaatee waxaan ku talineynaa inaad si dhakhso ah tallaabo u qaado

Dembiyada mulkiilayaasha iyo wakiilada

Mulkiilahaaga ama wakiilku waxay galeen dembi haddii aysan ku siin dukumiintiga lagama maarmaanka ah bilowga kireysigaaga oo ay ku jiraan:

> Qoraalka xuquuqda iyo waajibaadka (buug yar oo laga keenay Consumer Affairs Victoria)

> nuqul saxiixan oo ah heshiiskaaga kireysiga

> 2 nuqul oo ah saxiixan ahna Warbixinta Xaallada guriga (haddii aad bixisay debaaji)

> magaca buuxa ee mulkiilaha ama wakiilka, cinwaanka, lambarada taleefanka iyo fakiska

> lambarka xaalada degdega ee dayactirka degdega ah ee la isticmaali karo saacadaha shaqada wixii ka baxsan.

> marka la isticmaalo wakiilka guryaha, qoraal sheegaya inay amri karaan dayactir degdega ah iyo in kale (iyo haddii ay sidaa tahay, kharashka ugu badan ee ay amri karaan iyo lambarkooda ama lambarka fakiska ee dayactirka degdega ah).

Dembiyada kale waxaa ka mid noqon kara:

> iskudayga inay si sharci darro ah guriga kaaga saaraan (oo micnaheedu yahay amar maxkamadeed la'aantiis oo uu fuliyo boliisku)

> inay ku guuldareystaan ku siin la'aanta caddeynta ijaarkaad bixiso

> qabsashada ama iibinta alaabtaada wax ka mid ah sababtuna tahay lacag ijaar ah ayey kugu yeesheen

> inay ku guuldareysteen ku xareynta debaajigaada Residential Tenancies Bond Authority 10 maalmood oo shaqo gudahood markaad bixiso

> skudeyga inay kugu dalacaan waxyaalaha mulkiilaha ama wakiilada guryuhu aysan xaq u lahayn inay kugu dalacaan (tusaale, kormeerida guriga, heshiiska kireysiga, kaarka ijaar bixinta koowaad ama sameynta iyo isticmaalka inay si toos ah lacagta kaaga goostaan)

> soogelida gurigaaga kirada ah iyagoon fulin ogeysiinta haboon iyo waxa looga baahan yahay soogalitaanka ama isagoon haysan cudurdaar macquul ah (eeg warqada xaqiiqda ah ee ***Privacy*** wixii macluumaad dheeraad ah)

> ku guuldareysiga inay raacaan amar ay bixisay Victorian Civil and Administrative Tribunal

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dembiyada mulkiilayaasha ama wakiilada, la xiriir Tenants Union.

Sida loo sameeyo cabashada Adeega

Xalka Wakiilka Guryaha

Consumer Affairs Victoria's Estate Agent Resolution Service (EARS) waxay maamushaa cabashooyinka ku saabsan wakiilada guryaha Victoria. Adeega waxaa loo aasaasay inuu caawiyo macaamiisha,ay ku jiraan kireystayaasha ay isku afgaran la' yihiin wakiilkooda. Waxaad kala xiriiri kartaa EARS ☎ 1300 737 030

EARS waxay bixin kartaa macluumaad, tallo iyo xallinta muranka. Haddii aan lagaari karin xal, EARS waxaa laga yaabaa inay u gudbiso isafgaranwaaga Compliance and Enforcement at Consumer Affairs Victoria.

Sameynta cabbasho qoraal ah

Haddii aad rumeysan tahay in mulkiilahaagu ama wakiilka guryuhu inuu galay dembi, waxaad warqad u qori karaa Arimaha Macaamiisha ee Victoria (ka eeg warqad tusaale ah xagga kale). Xasuuso inaad ku lifaaqdo nuqulo ah wixii dukumiinti ah ee khuseeya arintan. Waxaad sidoo kale ku soo xareyn kartaa cabashada interneetka ah www.consumer.vic.gov.au

Warqada danbe ayuu la socotaa…

TENANTS UNION of Victoria Ltd

Arimaha Macaamiisha waa inay warqad dib kuugu soo qoraan laba toddobaad gudahood oo ay ku xaqiijinayaan inay heleen warqadaada. Haddii ay kuu sheegaan inayan arintan baadhi doonin, oo aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, la xiriir Ururka Kireystayaasha. Haddii ay go'aansadaan inay baaraan, way kula soo xiriiri doonaan si ay kaaga qoraan qoraal rasmi ah.

Haddii Arimaha Macaamiishu ay go'aansadaan inay dacweeyaan, waxaa laga yaabaa inaad maxkamada tagto markhaati ahaan oo aad maxkamada caddeynta ka hor sheegto.

Warqad cabashada ee tusaalaha ah

Waxaan soo socdaa waa warqada cabashada ee tusaalaha ah ee ku socota Arimaha Macaamiisha Victoria:

Consumer Affairs Victoria
GPO Box 123
Melbourne VIC 3001

(magacaaga)
(cinwaankaaga hadda)

(taariikhda)

Mudane ama Marwo

Cabasho ku saabsan (mulkiile/wakiilka guryaha)

Mulkiilaha: (magaca iyo cinwaanka mulkiilaha dembiga gelaya haddii ay ku haboon tahay)

Wakiilka Guryaha: (magaca iyo cinwaanka wakiilka dembiga gelaya haddii ay ku haboon tahay)

Guriga: (cinwaanka guriga la kireystay)

Sida (kireystaha/kireyste hore) ee guriga kore, waxaan jecelahay inaan xareeyo cabasho ku saabsan falalka (magaca mulkiilaha iyo/ama wakiilka guryaha). Waxaan rumeysan ahay inay jirto jebinta Residential Tenancies Act 1997(tax lambarada qaybta sharciga haddii aad taqaan).

(Sharax falalka ama dhacdooyinka keenay cabashadaada oo ay ku jiraan magacyada, cinwaanada, wakhtiyada, taariikhaha iwm)

Fadlan halkan waxaan idiinku soo lifaaqay nuqulada dukumintiyada soo socda (tax wixii dukumiintiyo ah ee khuseeya ee aad ku lifaaqayso warqadan).

Waxaan codsanayaa inaad si dhakhso ah u baartaan arintan idinkoo u arkaya dacwad. Waxaan dhawrayaa jawaabtiina degdega ah. Haddii aad u baahataan macluumaad dheeraad ah fadlan igala soo xiriira (lambarka taleefankaaga hadda)

Waa daacadaadii

saxiixaaga

Xaggee kale oo aad Ku sameyn kartaa cabasho?

Adigoo taleefan u diraya EARS iyo/ama warqad u qoraya Consumer Affairs Victoria, waxaad sidoo kale u leedahay xaq inaad ka sameyso cabasho ku saabsan mulkiilahaaga ama wakiilkaaga:

> Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission of Victoria
☎ 1300 292 153
(wixii ah dhibid ama kala soocid)

> Federal Privacy Commissioner
☎ 1300 363 992
(wixii ah khalad u isticmaalida macluumaad qarsoodi ah)

> Booliiska Victoria
(wixii ah falal dembiyeed ama dabeecad)

Wixii macluumaad dheeraad ah wac Tenants Union Advice Line ☎ (03) 9416 2577 ama kala xiriir EARS ☎ 1300 737 030.

fact sheet